

SUPPORTED BY

MAYOR OF LONDON

Waa maxay Disability Living Allowance (DLA) ee carruurto?

Disability Living Allowance waxa loo yaqaanaa DLA

Waa 'benefit' ka guud ee dawladdu ku caawiso ama aad qaadan karto haddaad daryeesho ilmo ka yar 16 sano.

Waa 'benefit' si toos ah akoonka bangiga kuugi dhici karta, kaana caawinaya kharashka dheeraadka ah ee ka iman kara daryeelka ilmahaaga jiran.

Yaa qaadan kara Disability Living Allowance?

Waad dalban kartaa DLA haddii ilmahaagu qabo jiro ama marxalad caafimaad, kana yar yahay 16 sano.

Waxa muhiima innaad ogaato:

Innaanad ubaahnayn innaad sugto aqoonsi jiro ee ilmahaagu si aad udalbato DLA

DLA ma aha mid kali loogu talagalay carruurta aad u naafadaa ah. Waad dalban kartaa haddii ilmahaagu daciif kuyey waxbarashada, Autism qabo, xaalado shucuureed iyo dabeecad ama naafo laxaadka ah qabo.

Waxaad u dalban kartaa DLA ilmahaaga markuu saddex bilood jiro, ama uu dhashaba haddii uu qabo cudur nolashiisa soo koobi kara.

Waad dalban kartaa DLA xitaa haddii aad shaqeyneyso, leedahay kayd ama lacag kale oo ku soo gasha jirto.

Kaliya xaalada sharci ama 'immigration' ee ilmahaaga ayaa la eegayaa markaad dalbatid DLA. Xaaladdaada sharci ee waalidka ama daryeele lama eegayo.

DLA ma dhimayso 'benefits' kaaga kale. Waxay kuugu biiraysaa 'benefits' aad qaadata sida housing benefits, tax credits ama universal credit tusaale ahaan

Maxaad ku isticmaali kartaa lacagta DLA?

Ma jiraan wax qawaaniin ah oo ku saabsan waxaad ku bixin karto lacagta DLA. Adiga ayey kugu xidhantay adoo udanaynaya wixii ilmahaaga jirada qaba u faa'ido ah ama ubaahanyey.

Waxaad u isticmaali kartaa innaad ku bixiso kharashka dheeraadka ah ee daryeelka ilmahaaga naafada ah sida qarashka cuntada gaarka ah ama waxyaabaha uu ku ciyaara ee khaaska ah.

Maxay DLA muhiim utay?

Maadaa moo daryeelka ilma qaba baahi saayid ah aad ukharash badan yahay, lacagta DLA isbadal weyn ama sameyn ayey ku keeni kartaa qoyskaaga.

Sidoo kale DLA waxay kaa caawin kartaa innaad hesho noocyo kale oo ah caawimaad maaliyadeed iyo benefit kale.

Maxaan ubaahanay innaan sameeyo si aan ilmahayga ugu dalbo DLA?

Waxaad ubaahantay innaad foom buuxsato.

Foomka waxaad kala soo dagi kartaa ciwaanka Intarnadka ee 'Department for Work and Pensions (DWP)'.

Balse waxa ka wanaagsan innaad wacdo 0800 121 4600 ee DWP, codsatana in foomka DLA lagu soo diro. Foomka waxa lagu shaam-badayn taariikhda aad wacdo, si hadhow lacagta laggaaga soo billaabo taariikhdaa. Waa muhiim, sababtoo ah foomku wuu dheeryahay, wuxuuna kugu qaadan kara wakhti badan buuxintiisu.

Haddii buuxinta foomku kugu adkaato, waad nasoo wici karta telefoonka, 0808 808 3555 ee Contact Helpline, si add talooyin u hesho iyo sida looga jawaabo sulaalaha DLA foomka ku qoran: www.contact.org.uk/dla

